# Galdaloolooyinka Cilmiga Dhaqaalaha

**W/Q Muxumed M. Muxumed (Khadar)**

**Sebt 12, 2023**

---

*"Cilmigan dib u heego dhaca*
*cilmigan dul ka xaadiska ah*
*cilmigan sama dawdarka ah*
*caqligu ka daboolan yahay*
*bukaankiyo daafka qaba*
*gumaysigu diin u yahay*
*Ilaah lagu diiddan yahay*
*…*
*cilmigan daldaloolka badan*
*damiirku ka meydka yahay" Hadraawi.*

*"Economics is haunted by more fallacies than any other study known to man" Henry Hazlitt.*

## Hordhac

Dhaqaaluhu waxa uu ka mid yahay arrimaha ugu mudan ee saamaynta tooska ah ku leh nolosha qofka, qoyska iyo qarankaba. Sidaas oo kale ayuu Cilmiga dhaqaaluhuna (*economics*) yahay tiirarka ugu waaweyn ee culuumta bulshada. Hase yeeshee, waxa marag maddoon ah, oo qofka cilmigan ku dhex jira aan ka qarsoonayn, in cilmigan iintiisu badan tahay, oo uu ku guuldarraystay in uu sidii la filayey u buuxiyo kaalintii uu dunida ugu jiray: ha noqoto in uu weydiimihii dhaqaalaha warcelin sugan u keeno; in uu dhibaatooyinkii dhaqaale si habboon u furdaamiyo; in uu masiibooyinka dhaqaale ee soo socda saadaaliyo; in fiirooyinka iyo aragtiyaha dhaqaale ee dunida badh ka shaqeeyay ay badhka kale ka shaqayn waayaan (gaar ahaan dalalka aan reer Galbeedka ahayn), iyo kuwo kale oo badan.

Ujeeddada maqaalkani waa in uu ardayda dhaqaalaha barata iyo cid kasta oo aqoontan danaynaysaba u iftiimiyo dhaliilaha ay aqoontani la daalaadhacayso iyo in ay ogaadaan halka ay sartu ka qudhunsan tahay. Waxa aan arkay dad badan oo dhaqaalaha bartay oo, in kasta oo ay sannado badan ku bixiyeen, haddana aanay waxba kaga duxin, ama dareemay in ay wax khaldan yihiin balse aan dhugan "sengaha daalay meeshuu, ka damqaayo heensuhu" (Gaariye). Dad badani marka ay waxbarashada dhammeeyaan, ee ay seyladda shaqada yimaaddaan, ayey ogaadaan in aanay xirfad ay ku shaqaystaanba lahayn.



Kuwo kale oo xataa aqoontan heersare ka gaadhay waxay hadhow garowsadaan in cilmigani aanuu xal muuqda u hayn dhibaatooyin farabadan oo dhaqaale oo iyaga iyo bulshadooda ku gedaaman.

Bal haddaba aan isku dayo in aan tilmaamo qaar ka mid ah galdaloolooyinka uu cilmigani leeyahay. In kasta oo uu qalinku ila mari karo, kutalagalkayga ma aha in aan ka hadlo dhaliilaha hannaan gaar ah, sida hantigoosiga calanwalaynaya, ee waxa aan ka hadlayaa cilmiga laftiisa. In kasta oo aan si guud u eegayo mawduuca, haddana waxa aan tilmaami doonaa isdiiddooyinka ka dhex jira cilmigan iyo bulsho Muslin ah oo innaga oo kale ah – waa marka uu yahay cilmigan Galbeedka innagaga yimid.

**Saynis Ismoodnimada Cilmiga Dhaqaalaha**

Waxaa jirta aqoon la isku yidhaahdo sayniska bulshada (*social sciences*) oo dhammaanteed hab-dhaqanka iyo arrimaha bulshada loogu barto siyaabo kala duwan, waxaana ka mid ah: dhaqaalaha, siyaasadda, cilmi nafsiga iyo barashada hab-nololeedka bulshada (*sociology).* Haddaba, in kasta oo saynis loo tixgeliyo culuumtan, oo laga duwo culuumta aadanaha (*humanities*) ee ay ka midka yihiin falsafadda, taariikhda, afafka, barashada diinta iwm, haddana macnuhu ma aha in ay culuumtani saynis u tahay sida fisigiska iyo kimistariga. Waxase xusid mudan in dhaqaaluhu uu yahay waaxda keliya ee ilaa xad isku dayday in ay saynis badhaxla' noqoto, isla jeerkaasna moodday in ay heerkaa gaadhay. Dhibaatada ugu weyni arrintan ayey ku sal leedahay.

Ugu horrayn, si saynisnimadan loo sugo, dhaqaalayahannadu waxa ay si xad-dhaaf ah u adeegsadeen xisaab. Dhaqaalaha hadda la barto, gaar ahaan mar kasta oo heerka waxbarashadu kor u sii socdo, waxa macnatirtay xisaabta sida kabadbadinta ah loo adeegsado iyo moodellada lagu dhiso xarfaha afka Giriigga. Badi cilmibaadhisaha iyo qoraallada ay dhaqaalayahannadu qoraan way adag tahay in ay dadka caadiga ahi fahmaan; iskaba dhaafe xataa waxa ay mararka qaar ku adkaataa in ay dhaqaalayahannadu fahmaan qoraallada dhaqaalayahannada kale.

Dhaqaalayahannadu waxa ay isku dayeen in ay dhacdooyinka dhaqaalaha xisaabeeyaan ama tirooyin ku saleeyaan, iyo in ay saadaal sameeyaan iyaga oo hab xisaabeed ka duulaya. Taasina waxa ay keentay dhowr dhibaato. Waa mare, doorsoomayaasha dhaqaalaha badhkood waa kuwo hadal la xidhiidha (*qualitative*) ee tiro ama wax la qiyaasi karo (*quantitative*) maaha – tusaale, qanaaco (*utility*), jamasho (*desire*). Waa mar kale e, in dhacdooyinka dhaqaalaha tirooyin lagu fasiro waxaa ku jira fudaydsi badan oo kakanaanta iyo wejiyobadnaanta dhacdooyinkan ah. Tani waxa ay keentay in ay dhaqaalayahannadu noqdaan kuwo xaqiiqada ka durugsan oo saadaashooda iyo odoroskoodu inta badan khalad yahay. Dhaqaalayahannada qaar ayaa ku dooday xisaabtu waa af ama luuqad la isku afgarto oo dhacdooyinka si fudud loogu sharxi karo. Balse dhaqaalayahan arrintan dhaliilsan ayaa mar yidhi bal sharrax xisaabeed ha loo keeno ‘waan ku jeclahay’.

Si ay saynisnimada u xaqiijiyaan, dhaqaalayahannadu waxa ay adeegsadaan “xeerar”. Haddaba cilmiga dhaqaalaha iyo guud ahaan cilmiga bulshadu xeerar ma yeelan karaa? Aragtiyaha cilmiga ahi dhow heer ayey maraan. Waxa ay ku bilaabmaan aragti mala’awaal ah oo aan weli la xaqiijin saxnimadeeda (*hypothesis*). Marka la helo caddaymo lagu sugayo oo loo maray hab cilmiyaysan waxa ay gaadhaa fiiro (*theory*).

Haddaba, derajooyinka ugu sarreeya ee aragtiyuhu gaadhaan waxaa ka mid ah in ay xeer (*law*) noqdaan. Xeerku waa aragti runnimadeeda la sugay iyada oo hab saynis loo marayo, oo meelo kala duwanna sidaa loogu dabiqi karo. Fikradda xeerarka waxa ay dhaqaalayahannadu ka soo ergisteen fisigiska. Haddaba, bal aynu waxyar isdultaagno weydiimaha ah: cilmiga dhaqaaluhu xeerar ma yeelan karaa? Haddii uu yeeshana, sida kuwa fisigiska oo kale ma loo fasirayaa ama loo qaadanayaa?

Ugu horrayn, dhaqaalaha iyo fisigisku waxa ay darsaan laba wax oo aad u kala fog. Fisigisku waxa uu darsaa dabeecadda iyo agab ama walxo halka dhaqaaluhu ka darso aadane iyo hab-dhaqanka aadanaha. Walxaha aan nafta iyo caqligaba lahayn ee biyaha iyo birtu ka midka yihiin siyaabo kala duwan ayaa loo darsi karaa, dhinacyo badan ayaa lagaga iman karaa, isbeddeladooda waa la go’aamin karaa, waana la saadaalin karaa. Tusaalle ahaan, biyaha haddii la kululeeyo ilaa ay 100 derajo gaadhayaan way uumibaxaan, haddii la qaboojiyo oo derajada heerkulka 0 (eber) laga dhigana adke ama baraf ayey isku beddelaan.

Haddaba, aadanuhu sidan oo kale miyey yihiin? Warcelintu waa maya. Aadanuhu waa makhluuq caqli leh (*rational*), mar haddii ay caqli leeyihiin oo ay iyagu ismaamulayaanna, suuragal ma aha in hab-dhaqankooda la go’aamiyo ama la saadaaliyo. Sidaas oo kale, aadanuhu waa xor oo mararka qaarkood waxa ay u fikiri karaan ama u dhaqmi karaan si ka baxsan sida la isla yaqaan. Xeerarka dhaqaalaha waxaa saldhig u ah hal kas ooqaad: caqli adeegsi (*rationality*). Jilayaasha dhaqaalaha oo ay ka mid yihiin iibsadayaasha iyo iibiyayaasha waxaa laga soo qaadayaa kuwo adeegsada sababayn caqli ku dhisan mar kasta oo ay go’aan qaadanayaan. Tusaalle ahaan, iibsaduhu marka uu wax gadanayo, waxa uu isbarbardhigaa sicirka uu waxaa ku iibsanayo iyo dheefta uu ka helayo. Ka soo qaad xeerka badeecaddaha la iib keenayo (*law of demand*) oo dhigaya markasta oo uu sicirka badeecaddu kordho xaddiga la iibsanayaa waa uu yaraanayaa. Xeerkani waxa uu ku taagan yahay kasoo qaadka ah sababayn caqli ku dhisan oo ah in iibsaduhu isbarbadhigo sicirka iyo dheefta.

Hase ahaatee, maxaa ka hortaagan iibsadaha in uu u dhaqmo si aan caqli ku dhisnayn ama uu siduu doono yeelo? Dee waxba. Ka soo qaad in marka ay xabadda Muuska ahi hal shilin tahay aan iibsan jiray 10 xabo.

Xeerku waxa uu dhigayaa in haddii sicirka xabadda Muuska ahi saddex shilin noqdo aan iibsan doono afar ama shan ama lix. Haddaba, sicirku ma yahay waxa keliya ee go'aamiya xaddiga aan gadanayo? Sow muuska ma jeclaan karo oo sicir kasta uma huri karo? Sow qoyskaygu 10 xabo maalintii uma baahan karo heer kasta oo uu sicirku gaadho? Oo maxaa ii diidaya in aan xabad muus ah ka bixiyo boqol kun oo shilin? Dee waxba. Waa go'aan gacantayda ku jira. Hab-dhaqankaygani waxa uu buriyey kasooqaadkii xeerka, taasoo ka dhigan in xeerkiina buray. Dhaqaalayahannada qaar waxa ay qabaan in xeerarka dhaqaalaha loo fasiro sidii aragti mala'awaal ah oo caqli gal ah oo ku saabsan hab-dhaqanka iibsadayaasha iyo iibiyayaasha oo ku sugan seylado tiro badan, ayna ku gedaaman yihiin xaalado badani.

Si ay saynisnimada cilmigan u sugaan, dhaqaalayahannadu waxa ay adeesgasaan hab saynis/cilmi ah (*scientific methodology*) iyo tijaabo (*experiment*). Hasa yeeshee, si aad uga fog saynisyahannada, dhaqaalayahannadu ma haystaan shaybaadh ay ku hubiyaan aragtiyahooda mala'awaalka ah. Halkii shaybaadhka waxa ay u adeegsadeen moodello dhaqaale oo dad dejiyeen, kuwaas oo inta badan ku salaysan mitir-dhaqaale (*econometrics*) iyo falanqaynta xogta tirada ah iyada oo habab kala duwan la adeegsanayo.

Moodelladan iyo fiirooyinka dhaqaaluhuba waxa ay ku qotomaan kasooqaadyo aan toos loo tijaabin karin. Moodelladu waxa ay sidoo kale si xad-dhaaf ah u adeegsadaan xarfo Giriig ah si, malaha, uu waxani dhadhan saynis u yeesho oo ugu ekaado wax kaalintii shaybaadhka buuxinaya. Runtuse waxa ay tahay, haddii xarfago Giriig ah la deegsado, haddii xarfo Carabi ah la adeegsado, iyo haddii summadihii geela Soomaalida la adeegsadaba, moodelladani ma buuxin karaan kaalintii shaybaadhka, qiyaasaha iyo saadaalinta ay sameeyaanna mar walba run looma qaadan karo. Hal kasooqaad oo isbeddela ama been noqda ayaa ku filan in saadaashii la sameeyay been noqoto.

Weydiin kale uu muhiim ahi waxa ay tahay, mar haddii dhaqaaluhu yahay wax hab-dhaqan aadane la xidhiidha, si dhab-abbaar (*objective*) ah oo ka madhan dareenka qofka, xaaladaha uu la nool yahay iyo waxa uu rumaysan yahay ma loo dersi karaa? Sababta weydiintan keenaysaa waa in saynisku u baahan yahay dhab-abbaarid. Si ay weydiintan uga warceliyaan, dhaqaalayahannadu waxa ay cilmiga dhaqaalaha u qaybiyeen laba qaybood: *positive economics* (oo ay yidhaahdeen waxa uu ku dhisan yahay dhab-abbaarid (*objectivity*)) iyo *normative economics* (oo ay yidhaahdeen waxa uu ku dhisan yahay dareen-abbaarid (*subjectivity*)).

## Aasaas Khaldan

Wixii ka horreeyaya qarnigii 19aad, cilmiga dhaqaaluhu waxa uu ka mid ahaa cilmi la isku odhan jirey dhaqaalaha siyaasaddeed (*political economy*). Xilligan, cilmigu waxa uu qayb ka ahaa cilmi ballaadhan oo bulshada dersa oo siyaasadda iyo arrimaha bulshaduba qayb ka yihiin. Hase ahaatee, qarnigii 19aad ayaa cilmigan la go'doomiyey, oo gooni looga saaray waaxihii kale ee cilmiga bulshada ee ay isku tiirsanaayeen, taas oo cilmiga dhaqaalaha ka dhigtay agoon.

Dhaqaalayahankii reer Ingiriis ee Alfred Marshall (1842-1924) ayaa la tilmaamaa in uu ahaa qofkii u horreeyay ee cilmiga dhaqaalaha gooni u saara, waxaana uu ka dhigay (*economics* ama *economic science*), markii uu 1890kii daabacay buuggiisii *Principles of Economics.* Gaar u saariddanna waxaa ku xigey dedaalka dheer ee aynu kor kaga soo hadalnay ee ay dhaqaalayahannadu u mareen si ay dhaqaalaha uga dhigaan cilmi saynis u ah sida fisigiska.

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee maanta haysta cilmiga dhaqaalaha waxaa ka mid ah ka go'doonsanaanta cilmiyada kale ee xidhiidhka la leh, taas oo dheellitirkii ka lumisay, adduun araggiisiina soo koobtay. Dhaqaalaha keligii lama baadhi karo ama lama baran karo, haddii aan cilmiyada ku xeeran lala eegin. Tusaale ahaan, haddii aad rabto in aad dal dhaqaalihiisa fahanto, waxa lamahuraan ah in aad fahanto siyaasaddiisa, sooyaalkiisa, bulshadiisa iyo deegaankiisa. Dhaqaale keligii cidlo taagan, oo tirooyin uun ka koobani, macno badan ma samayn karo, fasir iyo saadaal saxanna ma samayn karo.

Sida uu tilmaamay dhaqaalayahankii weynaa ee John Maynard Keynes (1936), "Dhaqaalayahanka weyni waa in uu leeyahay iskudhafka awoodo naadir ah – waa in uu noqdaa xisaabyaqaan, taariikhyahan, siyaasi, iyo ilaa heer, faylasuuf" (waxa lagu xigtay Oleh & Devachandara, 2021). Tan macnaheedu waxa weeyi, dhaqaalayahan macno leh ma noqon karo qof tirooyin uun ka shaqeeya balse aan fahan buuxa ka haysan xaaladdaha siyaasaddeed iyo bulsho ee ku gedaaman iyo tagtadaba.

Cilmiga dhaqaalaha ee maanta la bartaa waa diinlaawe. Aqoonta casriga ah ee ay reer Galbeedku bud-dhiggeeda leeyihiin waxa ay dhalatay, ama dib u curatay, waagii iftiiminta (*enlightenment*), xilligaas oo adeegsiga caqliga iyo sayniska mudnaanta u weyn la siiyey, diinta iyo nusuusta diimeedna daaqadda laga tuuray.

Bulshadii reer Yurub ee xilligaa noolayd sayniska ayey ku beddeshay diinta, mudnaanta caqligana wax walba way ka horreysiisay. Descartes waxa uu yidhi: "*I think therefore I am*; waan fikiraa dabeeto waan ahay" oo macnaheedu yahay caqligayga iyo fikirkayga ayaa go'aamiya jiritaankayga. Dhibaatada ugu weyn ee halkan ku jirtaa waa in caqligii la qaatay, qalbigiina laga tagey. Tan waxa ka dhalatay in wax kasta oo nolosha la xidhiidha caqligu go'aamiyo; xataa jiritaankii Ilaahay ayaa la yidhi haddii caqliga basharku diido Ilaahay ma jiro. Sidoo kale, qaayasoorradii akhlaaqeed ayaa laga soo qaaday macnala'aan. Aqoon diinla'aan ahi waa aqoon dhutinaysa, weliba marka ay tahay mid la xidhiidha dadka iyo bulshada. Tani waxa ay ka mid tahay sababaha ugu waaweyn ee uu cilmiga dhaqaaluhu inooga degi laayahay maadaama oo aynu nahay dad Muslin ah oo diintu kaalin mug leh ku leedahay noloshooda. Waxa aynu barannaa hannaan maaliyadeed oo ku salaysan dulsaar (ribo), khamaar, khiyaano iyo wax kasta oo aanay diinteennu ogolayn.

Cilmiga dhaqaalaha ee maanta la bartaa waxa uu ku salaysan yahay waaya-aragnimada bulsho cayiman – reer Yurub. Sida aynu soo sheegnayna, bulsho kastaa waxa ay la nooshahay xaalado gaar ah, mararka qaarna jaad-gooni ah, waxaana ay leedahay sooyaal iyada u gaar ah. Mar haddii aynu nahay Soomaali Afrikada Bari ku nool, cilmiga iyo hannaanka dhaqaale ee ku salaysan nolosha Yurub iyo Maraykan waxbadani innoogama gidhiish aha.

Dhaqaalaha maantu waxa uu ku salaysan yahay tartan (*competition*) iyo kelinnimo (*individualism*), yoolkiisuna waa hanti urursi iyo cirweyni. Waxaa sees u ah kasooqaad khaldan oo ah: hanti urursiga iyo gaadhista hoddantinnimada ayaa furdaaminaya dhibaatooyinka aadanaha oo dhan. Marka asaaskan laga duulo, cilmigan iyo hannaanka uu dhalay waxa uu soo saarayaa qof kelidiinoole ah, calooshiisa la ciyaar ah, hanti ururiya oo cir weyn oo aan waxba deeqin, oo noloshan dhalanteedka ah ee adduunyada u nool. Maadaama oo aynu nahay bulsho Muslin ah, yoolka dhaqaalaheennu waa in uu noqdaa cadaalad bulsho, dabargoynta saboolnimada, yaraynta sinnaanla'aanta bulshada iwm. Innaga hoddantinnimada qofka waa in ay innooga muhiimsanaato hodantinnimada bulshadu.

### Talo Soojeedin

Aniga oo ka shidaal qaadanaya xogta aan ku soo gudbiyey qaybaha kore, waxa aan talooyinkan iyo soojeedimahan soo socda la wadaagayaa ardayda rabta in ay barato ama haddaba barata cilmiga dhaqaalaha iyo cid kasta oo danaynaysa mawduucan.

1. Ogow in cilmigani aanuu ahayn saynis badhaxla' sida fisigiska iyo kimisteriga. Waxa aad baranaysaa waa cilmi bulsho oo ku aroora barashada hab-dhaqanka aadanaha.
2. Cilmiga dhaqaalaha keligii gaar looma baran karo, haddii aad sidaa yeeshana wax badan baa ku seegaya. Aad u akhri, oo wax badan ka ogow, culuumta ay ka midka yihiin taariikhda, siyaasadda, barashada hab-nololeedka bulshada, falsafadda iwm.
3. Dhaqaalaha maanta la bartaa waxa uu inta ugu badan ka sheekeeyaa dhaqaalaha dalalka hodanka ah – bulshooyin nolol ahaan aad innooga duwan. Isku day in aad cilmiga aad baranyso ku xidho waayahaaga iyo noloshaada. Aad u akhri dhaqaalaha laga qoray Soomaalida, wixii af Soomaali lagu qorayna aad u raadi.
4. Cilmiga aad baranaysaa haddii uu diinla'aan kaa noqdo adiga oo Muslin ah, wax dhadhan ah kuuma yeelanayo. Sidaa awgeed, waxaa lagamamaarmaan ah in aad dhaqaalaha Islaamka wax ka akhrido ama barato. Qiyaastii xilli 50 sannadood ka hor ah waxaa bilaabmay dedaal lagu Islaamaynayo cilmiga dhaqaalaha (*Islamization of economics)* si looga dhigo mid ummadda Islaamka ah noloshooda wax ka tara. Dhaqaalayahanno Muslimiin ah ayaa dhawaan ogaaday in dedaalkaa hore waxtar yeeshay balse wax badani ka khaldanaayeen. Sababta ugu weyni waa in uu weli ka duulayey aasaaskii khaldanaa ee aynu soo sheegnay. Dhaqaalayahanno ayaa hadda ku baaqay in la abuuro cilmiga dhaqaalaha Islaamka oo aasaaskiisu saxan yahay, diinta iyo waaya-aragnimada ummadda Muslinka ahna ku qotomo.

Muxumed M. Muxumed (Khadar)
Email: baadilmm@gmail.com

--------------

Muxumed Maxamed Muxumed (Khadar) waa dhaqaalayahan iyo cilmibaadhe deggan Hargeysa. Waxa uu qoray dhowr buug iyo maqaallo cilmi ah oo tobaneeyo ah. Buuggaagtiisa waxaa ka mid ah: *Dhaqaalihii Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, 1960-1991* iyo *Samafalayaasha Xun: Sooyaalka Qarsoon ee Hantigoosiga iyo Dalalka Hodanka ah* (turjumaadda buugga *Bad Samaritans* ee uu qoray Ha-Joon Chang).

**Tixraac**

Blaug, M. (2023, August 9). *Economics. Encyclopedia Britannica.* https://www.britannica.com/money/topic/economics.

Hahnel, R. (2002). *The ABCs of Political Economy: A Modern Approach*. Pluto Press.

Oleh, D. & Devachandara, A. W. (2021). Mathematical Economics: The Good and The Bad. Kanopi FEB UI.

Wang, A. Y. (2013, December 13). No, Economics Is Not a Science. The Harvard Crimson, 13. https://www.thecrimson.com/article/2013/12/13/economics-science-wang/

Zaman, A. (2015). Deification of Science and its Disastrous Consequences. *International Journal of Pluralism and Economics Education*, *6*(2), 181-197.

Zaman, A. (2016, January 18). What is Islamic Economics? WEA Pedagogy Blog. https://weapedagogy.wordpress.com/2016/01/18/what-is-islamic-economics/

Zaman, A. (2023, May 26). The Religion of Economics. WEA Pedagogy Blog. https://weapedagogy.wordpress.com/2023/05/26/the-religion-of-economics/